Somaliska

**BAAQA CAALAMIGA EE XUQUUQDA BANI’AADAMKA**
la ansixiyey sanadki 1948

* Dhamaan bani’aadamka oo dhan wuxuu ku dhashay xoriyad iyo sinaan iyo isku xuquuq, iyadoon loo eegeyn qabiil, midab, diin, siyaasad ama fikir kale, wadan ama dhalasho, hanti ama booska bulshada uu uga jiro.
* Dhamaan bani’aadamku wuxuu xaq u leeyahay nolol, xoriyad iyo nabadgelyo shaqsiyadeed.
* Cidna laguma sameyn karo jir-dil, bani’adanimo xumo ama ku tumasho ama ciqaab.
* Ragga iyo dumarka qaan gaarka ah, iyaga oo aan loo kala soocin xagga dhalashada, qowmiyada ama diinta, waxay xaq u leeyihiin inay guursadaan oo qoys abuuraan. Way u siman yihiin xaqa ku saabsan guriga, muddada xiriirka guurka socdo iyo marka uu xiriirkaas dhamaanayo. Guurku waa in labada qof ay isku raacsan yihiin.
* Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xorriyadda xagga fikradda, wacyiga iyo diinta iyo xuriyad inuu badalan karo diin ama aaminaad.
* Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xornimo xagga ra'yiga iyo hadalka.

* Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu shaqo helo, inuu u madax bannaanaado doorashada shaqada uu qabanayo, in sharuuduhu shaqada ahaadaan kuwo caddaalad ku fadhiya, isagana u danaynaya iyo inaysan shaqo la'aan ku dhicin.

* Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarasho. Waxbarashadu waa iney horumarisaa qofka korna u qaadaa xuriyadda iyo xuquuqda qofka.
* Qof kasta waajibaad bey ku leedahay bulshada.

**XEERKA KA HOTAGIDA DHINAC U SOOCIDA DUMARKA NOOC KASTABA UU YAHAY**
la ansaxiyey 1979

* Dumarku waa iney heystaan xuquuq buuxda ee bani’aadamka.
* Labada waalid ayaa mas’uul ka ah ubadka. Waa in la eegaa danta ubadka.
* Sharcigu waa inuu dhowraa xuquuqda dumarka iyo sinaanta ragga iyo dumar.
* Dumarka si ku meelgaar ah ayaa loogu eexan karaa haddii ujeedadu tahay in la gaaro sinaan.
* Dumarku waa in si la siman ragga uga qeyb qaadan karaan doorashada, qaban karaan shaqo bulsho kana qeyb qaadan karaan howlaha wadanka ee siyaasada iyo shaqooyinka ururada caalamiga.
* Waa in wax laga qabtaa si loo bedelo dhaqanka bulshada ee ragga iyo dumarka, hoosudhigga dumarka iyo dhaqanka ku saleysan in ragga iyo dumarku kala sareeyaan ama la baabi’iyo fikirka gaboobay ee waxa ragga iyo dumarka kala qaban karaan.
* Dumarka waxey sida ragga xaq u leeyihiin iney qaataan, badashaan ama heystaan dhalashadooda laguma qasbi karo dhalashada ninka guur dartii.
* Ubadku ma aha in si toos ah uun u qaato dhalashada aabaha.
* Dumarku sida ragga ayey xaq u leeyihiin waxbarasho, mid jaamacadeed iyo imtixaan iyo suuqada shaqada.
* Waa in laga hortagaa fikirka qalafsan ee ku saleysan ragaa iyo dumarka dhinaca waxbarashada iyo shaqada. Buugaagta waxbarashada waa ineysan ku saleysneeyn fikirkaa ee ay dhiirigaliyaan doorashada waxbarasho iyo shaqo iyadoon loo eegin rag iyo dumar.
* Dumarku waxey sida ragga xaq u leeyihiin iney doortaan shaqadey rabaan, mushaar la eg kan ragga iyo amaanada bulshada, xaq u leeyihiin difaaca shaqo iyo gunooyinka qoyska, deynka bangiga iyo deymaha kale.
* Dumarka lagama ceyrin karo shaqo uur ama hooyanimo darteed.
* Bulshadu waa iney horumarisaa adeega sahlaya isku lamaaneynta nolosha qoyska iyo shaqada iyo ka qeyb qaadashada nolosha guud.
* Dumarku xaq buu u leeyahay daryeelka caafimaad iyo iney go’aan ka gaaraan iney doonayaan ubad iyo in kale.
* Dumarku iyo ragga wey siman yihiin sharcig ahaan iyo marka la tagayo maxkamad.
* Hanti yeelashada lagama hor istaagi karo dumarka.
* Dumarku xaq buu u leeyahay socoshada iyo doorashada meesha ay ku noolaanayaan.
* Dumarku sida ragga ayey xaq u leeyihiin iney guursadaan, doortaan qofka ay guursanayaan, ogolaadaan guurka, xuquuq iyo xil ku yeeshaan guurka iyo iney xaq la siman ragga u leeyihiin furitaanka.
* Dumarku waxey xaq u leeyihiin iney noqdaan mas’uul ka noqdaan, mas’uuliyada ubadka iyo korsasho ubad aan la dhalin.
* Dumarku sida ragga ayey xaq u leeyihiin iney doortaan magaca danbe eey doonayaan.

Dumarku sida ragga ayey xaq u leeyihiin iney doortaan magaca danbe eey doonayaan.

**HESHIISKA XUQUUQDA UBADKA**
la ansixiyey 1989

* Iswiidhen waxa caruur loo arkaa qofka da'diisu ka yar tahay 18 sano.
* Wax kasta oo quseeya ubadka waa in danta ubadka laga hormariyaa. Ubadku xaq buu u leeyahay nolol.
* Ubadka waa in la diiwaan geliyaa isla marka uu dhasho, loo bixiyaa magac, la siiyaa dhalasho iyo iney xaq u leeyihiin haddii ay suuragal tahay iney ogaadaan cida u ah waalid.
* Ubadka lagama kaxeyn karo waalidkood iyagoon ogoleyn.
* Ubadka waa laga kaxeyn karaa waalidkood haddii taa danta ubadka ay ku jirto sida marka lagu takri falo ama la dayaco ama waalidku kala nool yahay qasabna ay tahay in la go'aamiyo halka ubadku ku noolaanayo.
* Ubadku waalidkii kala nool yahay waa inuu xiriir la leeyahay labada waalid, haddii taasi danta ubadka ay ku jirto.
* Ubadka si sharci dara ah loogama saari karo dalka ama laguma heyn karo dibadda.
* Ubadku xaq buu u leeyahay fikirkiisa u gaarka ah arimaha isaga saameeya. Balse waa in loo eegaa ubadku da'diisa iyo inta maankiisu la egyahay.
* Waa in la xushmeeyaa fikirka xurta iyo kan diimeed ee ubadka.
* Ubadka loolama dhaqmi karo sidii la doono ama si sharci dara ah looma soo dhexgali karo arimahooda qaaska ama qoyska.
* Ubadka, iyadoo loo eegayo sharciga, waa in laga ilaaliyaa dhamaan dhaawaca jirka ama qalbiga, waxyeelada ama ku takrifalka, dayacaada ama si xun ula dhaqanka, dilka jirka ama isticmaalka uu ku jiro ku takri falka galmada ah.
* Ubadka sida ku meelgaarka ama joogtada ah looga kaxeeyey reerkooda waxey xaq ugu leeyihiin bulshada ilaalo iyo caawimaad. Waa in la tixgeliyaa dalka, diinta iyo afka ubadku ka soo jeedo.
* Ubadka qaba naafo jir ama maskax wuxuu xaq u leeyahay nolol mudnaan iyo darajo leh.
* Ubadku wuxuu xaq u leeyahay caafimaad, daryeel iyo amaano bulshadeed.
* Ubadka laguma sameyn karo waxyeelo ku saleysan dhaqanka taasoo dhaawici karta caafimaadka ubadka.
* Ubadku wuxuu xaq u leeyahay waxbarasho horumarineysa shaqsiyada ubadka, dhaxalka iyo itaalkiisa jireed iyo maskaxeed. Waxbarashada ubadku waa iney horuudhigtaa xushmada waalidka, tan dhaqanka uu ka yimid, afka iyo aaminaadiisa, tan dalka uu ku nool yahay iyo dalka uu ka yimid iyo dhamada ka duwan kan ubadka.
* Ubadku wuxuu xaq u leeyahay nasasho iyo waqti fasax, ciyaar, madadaalo iyadoo loo eegayo da'diisa.
* Ubadka lama af-duubi karo, iibin karo ama looma isticmaali karo si dhaawaceysa ubadka.

> *"Dhaqan, diin ama aaminaad kale darteed looma gumeysan karo dumarka. Dhaqan, diin ama aaminaad kale darteed loogama hortagi karo innan yar iney u noolaato sidey dooneyso isla markaana gaarto go'aanka ay dooneyso."*
> *Mona Sahlin*

somaliska



## Sadax qeyb oo ka mid ah Dokumentiga caalamiga ee *

# QARAMAD MIDOOBAY

- **Baaqa caalamiga ee xuquuqda bani'aadamka**
- **Xeerka ka hortaga dhinac u soocida dumarka nooc kastaba uu yahay**
- **Heshiiska xuquuqda ubadka**

**Waxaa isku soo dubariday**:
Simone Lindsten, Länsstyrelsen Västra Götalands län
**Turjume**:

LÄNSSTYRELSEN
VÄSTRA GÖTALANDS LÄN

* Qoraalka oo dhan, eeg www.humanrights.se